



## Qorshaha Istraatijiyada ee ku saabsan Ka Qeybgelinta Muhaajirka iyo Qaxootiga 2019-2024 Soo Koobidda Fullinta

Qorshaha istraatijiyada Soo Dhaweynta San Diego (Welcoming San Diego) ee ku saabsan ka-qeybgelinta muhaajirka iyo qaxootiga waa sawir buuxa oo laga sameeyay gobolka San Diego si ay isugu keento bulshadaha cusub iyo kuwa dhalladka ah una gaaraan horumar iyo mustaqbal ka dhexeeyo.

Talooyinka waa isu keenidda waxa ay ku biiriso bulshada iyo wada hadalada dadka xilka ka saaran yahay ilaa sannadka 2018. Qorshaha shanta sanno wuxuu ku bilowdaa afar talooyin oo la xariira qeybaha oo qoto dheereeya iyo ballaariya hawsha middaynta muhaajirka, iyo kor u qaada wada hadalka iyo iskaashiga. Kaddibna waxaa ku xiga talooyin la xariira meelaha muhiimka ah: fursadda dhaqaalaha, waxbarashada, ka qeybgelinta, madaniga iyo ammaanka iyo xariirka ka dhexeeyo bulshada.

Mid kasta oo ka mid ah talooyinka waxaa la socda istraatijiyada muddada dheer iyo muddada gaaban laga bilaabo siyaasadda ilaa maalgelinta ilaa cusboneysiinta ku dhisan hawlaha iminka jira ee model u sameeya dhaqanka ugu fiican. Qorshahaan wuxuu u baahan doonaa in dhamaan dadka ay quseeyso ay ballan qaadaan wada shaqeyn, isgaarsiin iyo la-xisaabtan. Marka la adeegso wada shaqeyn si loo gaaro himilooyinka, waxaan sii wadi doonaa hiddaha ay ku faanto San Diego oo ah in ay tahay albaabka soo dhaweynta rajada, dhiseyaasha iyo kuwa raadiya xoriyadda.

Qorshaha buuxa iyo himilooyinka, talooyinka iyo istraatijiyada waxaa laga heli karaa internetka:  
[www.welcomingsd.org](http://www.welcomingsd.org)

### Soo Koobidda Talooyinka

#### Iskaashiga-Qeybaha:

1. Samee Xafiiska Horumarinta Muhaajirka (Office for Immigrant Advancement) (OIA) si loo dhiso loona horumariyo siyaasadaha brograamyada iyo dhaqanka muhaajirka San Diego.
2. Kordhi iyo kala sooc hababka maal gelinta si aad ula kullantid baahida kala duwan ee imaadeyaasha cusub, si aad u taageertid siistemyada ka-qeybgelinta iyo si aad uga fa'iideysatid iskaashiga.
3. Adeegso isu keenidda xiiladda si aad u iftiimisid sheekooyinka muhaajiriinta iyo bulshadaha qaabilsan soo dhaweynta, qabashada agendada la xariira wada hadalada gobolka iyo xafladaha hiddaha.



4. Ka fa'iideyso xogta iyo fulli qiimeynta si aad u horimarisid siyaasadaha iyo dhaqanka ku saabsan ka qeybgelinta muhaajirka.

#### **Fursadda Dhaqaalaha:**

5. Adeegso ku meeleynta shaqada, badbaadinta xuquuqda, ka qeybgelinta shaqada, kor u qaadidda xirfadda iyo dib u shahaadeynta si aad u fududeysid horumarinta shaqada shaqaalaha muhaajirka.
6. Horumarinta ganacsiga muhaajirka iyo taageer ganacsiga muhaajirka leeyahay.
7. Horumari aqoonta maaliyadda bulshada imaadaha cusub.
8. Hubso dagganaashada guriga iyo yaree waxyaabaha ku dadban lahaashada guriga.

#### **Waxbarashada:**

9. Ka qaad waxyaabaha ku dadban brograamyada waxbarashada iminka jira ee loogu talagalay caruurta iyo dadka waaweyn, iyo balaari ka qeybgelinta iyo taageerada la siiyo qoyska.
10. Xooji manhajka hiddaha badan ee la xariira waxbarashada K-12 iyo kordhi adeegyada lagu taageero ardayda cusub.
11. Kordhi horumarinta aqoonyaanka iyo si qoto dheer uga shaqeey iskaashiga ka dhexeeyo dugsiyada dagmada iyo ururada bulshada muhaajirka.

#### **Ka Qeybgelinta:**

12. Ballaari helitaanka luqadda iyo hubso in adeegyada u roon yahiiin isticmaalaha iyo in ay ka jawaabaan arrimaha la xariira hiddaha.
13. Taageer xuquuqda madaniga iyo cirib tir dhaqanka aan taxadirka lahayn.
14. Kordhi dhaqaaqa iyo isticmaalka gaadiidka dadweynaha.

#### **Ka Qeybgelintaa Madaniga:**

15. Kordhi ka qeybgelinta madaniga Mareykanka cusub iyo kuwa rajada ka qabo in ay noqdaan Mareykan.
16. Samee habab lagu dhiso laguna taageero ka qeybgelinta madaniga si loo kordhiyo dhallashada.
17. Horumarinta hoggaamiyeyaasha muhaajiriinta iyo qaxootiga.

#### **Bulshado Ammaan ah oo Isku Xeran:**

18. Taageer kalsooni iyo isgaarsiinta ka dhexeyso waaxyada ammaanka dadweynaha iyo muhaajiriinta daggan.
19. Kordhi awoodda hirgelinta sharciga si ay ugu adeegaan bulshada luqadaha iyo hiddaha badan.
20. Fududee dhismaha-bulshada dhalladka iyo kuwa ku dhashay dibadda.

Internetka kala soco qorshaha oo buuxa: [www.welcomingsd.org](http://www.welcomingsd.org)

